



# READ

**– SIDA AAD KU TAAGEERI KARO ILMAHAAGA  
AKHRISKIISA KOOWAAD EE MADAXA BANAAN**



## READ

### SIDA AAD KU TAAGEERI KARO ILMAHAAGA AKHRISKIISA KOOWAAD EE MADAXA BANAAN

Ka hadal buugga KA HOR intaanad akhriyin, MARKA aad akhrido iyo KA DIB markaad akhriday - qaab la mid ah marka aad si kore wax ugu akhrido ilmahaaga. Eeg booga dambe “Sida wax loola akhriyo ilmahaaga”.

Haddii qoraalku aad u adag yahay, waxaad ugu akhriyi kartaa si kore ilmahaaga. Intaa kadib, ilmahu waxa uu isku deyi inuu akhriyo qoraalka laftiisu.

Waxaad sidoo kale wada jir u akhriyi kartaa buugga si kore isku mar.



Haddii ay jiraan kelmaddo aanu ilmahu akhriyi karin, waxaad ku taageeri kartaa addoo:

- Oggolaanaya ilmahu inuu qiyaaso iyaddoo ku salaysan sawirada ama macnaha guud.
- Dheh xarafka koowaad/dhaqada kelmada.
- Ku dhiirigeli ilmaha inuu dhaho xarfaha/dhawaqyada.
- Dheh qaybta koowaad ee kelmada.
- Ugu akhri kelmada kore ilmahaaga.

Ha sixin ilmahaaga haddii isaga ama iyaddu khalad wax u akhrido iyaddoo saamayn ku leh fahanka wax la akhriyayo mooyee.

Ku ammaan ilmahaaga isku daygiisa ama keeda akhriska ah.

Shayga lama hiraanka ah maaha inuu ilmahaagu wax u akhriyo si sax ah, laakiin inuu ilmahaagu ku celceliyo oo uu ku faraxsanyahay wax ku saabsan akhriska.

Waxaad ku taageeri kartaa akhriska ilmahaaga addoo waydiinaya rabitaanka xooga ah ee iskudaygiisa ama keeda akhriska.

- Sideed ku ogayd in kelmaddu ay tahay...?
- Kelmaddu maxay u noqon wayday...?
- Xarafkee/dhawaqee ayay kelmadu ku bilaabantaa?
- Macani buuxa ma samaaysaa?